

**BARASHADA CILMIGA
ULTRASOUND KA**

Dr. CABDIRISAAQ

Axmed Maxamuud

Lahaanshaha dhiganahan

Lahaanshiyaha dhiganahan **Barashada Clmiga Ultrasound ka** , waxaa leh qoraaga qoray oo u huray maskax iyo maal. Lama rogan karo, lama daabacan karo, lamana beddeli karo qeyb ka mid ah ama gebi ahaan, iyada oo aan fasax buuxa laga haysan qoraaga qoray dhiganaha.

© **Dr Cabdirisaaq Axmed Maxamuud**

Daabacaaddii 1-aad, 2020

Muqdisho –soomaaliya

Waxaa lagu daabacay

*Madbacadda **Yalax***

Tel: +252615241028

AFEEF

Maqaldame waa Allaah (SWT),waxa aan ka afeefanayaa qalad kasta oo iga dhacay, Aniga waxa aan ahay bini'aadam,hadii aad qalad ku aragto inta aad buuggaan akhrineyso waxa aan ka codsan lahaa oo jeclaan lahaa in aad ila so socod siiso si aan u saxo qaladaadka buugga ku jira, waan idinkaga mahad celinayaa hadii aad ila wadaagtaan wixii qaladaad ah ee ku aragtaan buuggaan inta aad aqrineysaan mahadsanidiin.

Mahad celin

Waxaa mahad iska leh Allah (SWT) oo nasiiyay nimcooyin badan,nafaray inan mar walbo ku shukrino.waxaa xusid iyo mudnaan iska leh waalidkeyga isoo barbaariyey waliba ila soo maray dhib iyo rafaad badan,una soo dulqaatay duruufaha iyo waayaha adag ee noolasheyda,kuna soo dadaalay heerka maanta aan taaganahay,ila wadaagay dhib iyo dheefba.Allah waxaan u weydiinayaa in uu u dambi dhaafa adduun iyo aakhiraba,jannadii firdowsa guri uga dhiso. waxaan u mahad celinayaa dhammaan macallimiinteyda iyo qof walbo oo igala qeyb qaatay iina muujiyay farxad,dhiiragalin iyo soodhaweynba.

dhamaantood waxay mudan yihiin inan u mahad celiyo.

waxaa si gaar ah ugu mahad celinayaa qof waliba oo garab igu sii qorista buuggaan si qaas asxaabteyda kala ah:

1. Ustaad Daahir Cumar Bare
2. Dr Abdishaahid Abdulkadir Mahamed
3. Cali Yusuf Cali

sido kale waan u hambalyeynaa ummadda soomaaliyeed dhamaan meel walba ay joogaan ugu dambeyn waxaan mahad balaaran u jeedinayaa akhristaha buugga oo kalsooni dheeraad ah igu siiyay iguna dhiira giliyay soo saarista buugag kale, dhamaantiin waxaan Alle idiinkaga baryaa inuu Allah idiin kugu darro miisaanka xasanaadka maalinta aakhiro.

Tusmada Buugga

Lahaanshaha dhiganahan	i
AFEEF	ii
Mahad celin	iii
Hordhac	viii
Nuucyada ultrasound Ka iyo Meelaha Lasaaro.	1
Nuucyada sawirada ultrasoundka	1
Controls of the Ultrasound Equipment (sida loo hago qalabka ultrasoundka) ...	3
Cutubka 1aad	5
Abdominal ultrasound (kumbuyutarka uur kujirta)	5
Hordhac	6
1. The Liver (Beerka)	6
1.1 Habka loo Arko Beerka iyo Xubnaha Laxariira:	7
1.2 Acute hepatitis (Cagarshow Cusub ee Kudhaca Beerka)	8
1.3. Chronic hepatitis (Cagaarshow Dahay)	9
Cutubka 2aad	15
Abdominal ultrasound in the diagnosis focal liver lesions – fluid lesions	15
Ultrasoundka uurjirta Waxaa Lagu Baaraa Nabraha Kuus Kuusan Iyo Biyaha Kujira Beerka.	15
Cutubka 3aad	21
Abdominal ultrasound in the diagnosis of focal liver lesions – solid lesions	21
Ultrasoundka uurjirta Waxaa Lagu Baaraa Nabraha Kuus Kuusan Iyo Adkaha Kujira Beerka.	21
A. Hepatic hemangioma(Burada ku dhacda xididada Beerka)	22
b. Hepatic adenoma(Burada Beerka ee aan Faafin)	23
C. Focal nodular hyperplasia FNH (Burada Kuusan ee Beerka)	24
2. Malignant hepatic tumors(kansarka Beerka)	24
A. kansarka aas aaska u ah burooyinka beerka (hepatocellular carcinoma HCC)	25
B.Kansarka ku dhaca tubooyinka beerka(cholangiocarcinoma)	26
C.Kansar bureedka ku faafa beerka(liver metastases)	27
Cutubka 4aad	29

Ultrasound of the gallbladder and biliary tree (ultrasoundka xameetida iyo tubooyinka).....	29
1. The gallbladder(Xameeti).....	30
2. Ultrasound of the biliary tree(ultrasoundka Tubooyinka).....	35
Cutubka 5aad	36
Ultrasound of the kidneys (ultrasoundka Kilyaha)	36
1. Normal kidneys(kaliyaha caadigaa)	37
2. Kidney malformations(kalida oo si qaldan u samysantay).	37
3. Renal cysts(kelida oo biyo kusan kun jiraan).	38
4. Renal lithiasis (kidney stones)(Dhagaxa kalida).....	39
5. Hydronephrosis(kaadida oo ku laabatay kelida)	41
6. Renal tumors(Burooyinka keliyaha).	41
7. Renal failure(Kalida oo aan si wanagsan u shaynayn).	43
THE ADRENAL GLANDS(Qanjiro kuyaala qayta sare ee 2da kaliyood).....	44
Cutubka 6aad	46
Ultrasound in obstetric and Gynecology	46
(ultrasoundka Hooyada uurka leh iyo hooyada aan uurka lahayn)	46
Hordhac.....	47
Ultrasoundka sedexda bilood ee ugu horeeya Hooyada uurka leh	47
Ultrasoundka makaanka lagaliyo ayaa lagu baaraa uurka 3bilood ee ugu harayda	48
Tilaabooyinka la qaado marka baaritaanka loo adeegsanaayo Ultrasoundka makanka lagaliyo.....	49
Embryo(uur jiif).....	52
Sedexda Bilood ee ugu Horaysa Wqatiga uurka.....	55
Xaqiijinta Da,da uurka 3da bilood ee ugu horayda.....	55
Cabiraada lasameeyo 3da bilood ee u horayda uurka.....	56
Calaamadaha uurka Halaabay	58
Calaamadaha Baaritaanka uur hallaabay 3dii bilood ee ugu horaysay.	59
CONCLUSIONS (Gaban Gabo).....	59
Cutubka 7aad.....	60
ULTRASOUND IN THE SECOND TRIMESTER.....	60

Ultrasoundka sedexda bilood ee Labaad Hooyada uurka leh	60
Horudhac	61
Qaab dhismeedka aas aasiga ah ee uur jifka	65
4. Qalfoof(Skeletal)	68
CUTUBKA 8AAD:	70
ULTRASOUND IN THE THIRD TRIMESTER OF PREGNANCY	70
Cutubka 8aad :Ultrasoundka sedexda bilood ee ugu Danbayda Hooyada uurka leh	70
Horudhac	71
Qaybaha 3da bilood ee ugu dambaysa lagu baaro ultrasoundka	71
Cutubka 9aad :	76
ULTRASOUND EVALUATION OF TWIN GESTATIONS	76
(ultrasoundka waxaa lagu qiimeeyaa Urka mantaanaha).	76
DISCORDANT TWINS(Mataano iskhilaafsan)	82
Cutubka 10aad:	87
Placental Abnormality(Mandheer aan caadi ahayn).	87
INTRODUCTION(Hordhac)	88
PLACENTA PREVIA(Mandheerta soo Hormarta)	89
Cutubka 11aad:	99
AMNIOTIC FLUID ASSESSMENT(In laqiimeeyo Dareeraha Xabka ah).	99
HORDHAC	100
OLIGOHYDRAMNIOS(Biyaha Xabka oo Yarada)	102
POLYHYDRAMNIOS(Biyaha Xabka oo Bata)	104
Cutubka 12aad:	106
ULTRASOUND OF THE NON-PREGNANT UTERUS	106
(ultrasoundka minka aan uurku kujirin).....	106
PREPARATION FOR THE EXAMINATION(Habka loo diyaariyo baaritaanka)	107
ADENOMYOSIS(burada muruqa minka)	110
CONGENITAL UTERINE MALFORMATIONS (Minka oo si qaldan u samaysmay oo lagu dhasho)	112
LEIOMYOMAS(burada minka ee aan faafin)	113

Hordhac

Ultrasound: waa erey loo isticmaalo in lagu qeexo soo noq noqoshada codka ka sareeya 20 000 Hertz (Hz),codkaa soo ka baxsan heerka maqalka bini aadamka. Sidaas waxaa ku qeexay WHO haayada caafimaadka aduunka .Baaritaanka ultrasoundka caadiga ah jabaq noqoshadiisu waa 1–30 megahertz (MHz).wax yaabaha soo socda waa heerarka kala duwan ee jabaq noqoshada,ku waasoo loo isticmaalo in lagu baaro qeybaha kala duwan ee jirka.

- 3–5 MHz for abdominal areas (3-5MHz waxaa loo isticmaalaa uur kun jirta).
- 5–10 MHz for small and superficial parts (5-10MHz waxaa loo isticmaalaa qaybaha sare iyo kuwa yar yar).
- 10–30 MHz for the skin or the eyes(10-30MHz waxaa loo isticmaalaa maqarka iyo indhaha).

Nuucyada ultrasound Ka iyo Meelaha Lasaaro.

1. Abdominal Ultrasound: waa ultrasoundka la saaro uur kun jirta sida Beerka(liver),xameetida(Gallbladder),Beerka yarada(spleen),Kaliyaha(Kidneys).

2. Pelvic Ultrasound: waa ultrasoundka lasaaro miskaha/sinaha sida minka (uterus), ugxansidaha(ovaries),qanjirka borostatada(prostate gland).

3. Transvaginal Ultrasound: waa gudbiye ku xiran qalabka ultrasoundka waxana la galiyaa makaanka is loo xaqiijiyo waxyaabaha sababa miska xanuunka.

4. Obstetric Ultrasound: waa ultrasoundka la saro hooyada uurka leh si loo ogado xalada uurjiifka.

Nuucyada sawirada ultrasoundka

4 Nuuc ayaa loo qaadaa sawirada ultrasoundka **1. 2D ultrasound** waxaa loo isticmaala inuu soo saaro 2ba sawir oo laga soo qaaday xubnaha gudaha ku jira sida kalida.

2. 3D ultrasound waxaa loo isticmaala inuu soo saaro 3sawir oo laga soo qaaday xubnaha banaanka ah, sida in lagu ogaado faruuranka uur jiifka(Cleft lip).

3. 4D ultrasound waa 3D ultrasound oo la casriyeeyey(updating) kaa soo lagu kordhiyey inay sawiradu dhaqaqaan.

4. Doppler ultrasound waxaa lagu qii meeyaa qulka dhiiga ku socda xididada.

Ultrasound Transducer Sidoo Kale Waxaa Lagu Magacaabaa Probe: waa qalab soo raara mowjado cod ah ku waa soo ku dhaca unugyada jirka kadibna sameeya jabaq noqosho. Qalabkani sidoo kale wuxu aqbalaa jabaq noqoshada kadibna wuxuu u diraa kumbuyutarka waxana loo isticmaalaa in laga sameeyo sawir lagu magacaabo Sonogram.

Piezoelectric crystals: waa walxo awooda in ay u badalaan shaqada mishinka tamar koronto, waana walxo muhiim u ah ultrasound kasta.

Types Ultrasound Transducer (Nuucyada qalab ka soo saara mowjadaha codka)

1. Convex Transducer : waa qalab soo saara mowjado cod ah marka lasaaro uur kujirta sida Beerka(liver), xameetida(Gallbladder),Beerka yarada(spleen),Kaliyaha(Kidneys).

2. linear Transducer : waa qalab soo saara mowjado cod ah marka lasaaro Qanjirka Tayroodhka & Naasaha.

3. Endocavity Transducer : waa qalab soo saara mowjado cod ah marka lasaaro Makanka & Malawadka.

4. Pencil Transducer: waa qalab soo saara mowjado cod ah marka lasaaro xididada dhiiga.



Controls of the Ultrasound Equipment (sida loo hago qalabka ultrasoundka)

Hagitaanka aas aasiga ah ee loo baahanyahay waqtiga hore ee baaritaanka ultrasoundka waa sida soo socota:



Figure 2.9: Ultrasound equipment showing a wide array of knobs for control of various features. Most ultrasound equipment have a keyboard and a trackball on their consoles.

1. Depth: Batoonkani wuxuu kuu ogalaadaa in la siyaadiyo ama la yareeyo sida loo arkaayo xubinta ama Meesha la baarayo ultrasoundka.
2. Gain: batoonkaan wuxuu siyaadiyaa ama yareeyaa iftiinka xubinta labaarayo ayadoo loo wareejinaayo saacad wareeg ama lid saacad wareeg.
3. Time gain compensation TGC: waxaa lagu habeeyaa iftiinka qotada sawiro qaas ah, qaybta sare ee batoonadaan waxay siyaadiyaan ama yareeyaan iftiinka qaybta dhow Transducer ee gudbiyaha ultrasoundka, qaybta Hoose ee batoonadaan waxay siyaadiyaan ama yareeyaan iftiinka qaybta fog ee gudbiyaha ultrasoundka.

4. Freeze: Batoonkaan waxaa loo isticmaalaa inuu sawirka ku hayo shaashada ultrasoundka kadibna lasameeyo cabirka xubinta lasaaray ultrasoundka.

5. Track ball: waa baton loo isticmaalo in lagu dhaqdhaqaaajiyo xubinta ultrasoundka la saray waxaana la dhigaa Meesha la rabo in lagabilaabo cabirka.

6. Measurement: waxa lagu cabiraa sawirka saran shashada ultrasoundka markii aad riixdo baton kan, mouse wuxu saaranyahay shaashada kadibna waxad go aan sata Mesha aad dhigi lehed mouse ka kadibna jiid mouse ka ila ad ka gayso Mesha cabirku ku egyahay.



Figure 2.12: Time Gain Compensation (TGC) on an ultrasound consol. The upper and lower knobs adjust brightness in the upper and lower fields respectively (labeled). The overall knob (labeled) adjusts brightness in the whole image.

Cutubka 1aad

**Abdominal ultrasound (kumbuyutarka uur
kujirta)**

Hordhac

Waa habka kaliya oo lagu qaado sawirada ultrasoundka ee la isticmaalo maalin kasta, Daaweynta casriga ah waxay muhiimad siiyey in la balaariyo baaritanka laguna caawiyo xaaladaha deg-dega ah si loo sameeyo qiimeyn aas aasiya iyo in lagula socdo Bukaanaada ka cabanaya calaamadaha kala duwan ee uur ku jirta, sida bukaanaada ka cabanaya cagarshowga soo dahay ee beerka, bukaanaada kansarka qaba iyo bukaanaada jugtu uga dhacday uur ku jirta, Qiyaas transducer ku inuu yahay qalab ku xiran ultrasoundka ee lasaaro dusha sare ee xubnaha bixinayana iftiin toosh, iftiinkaas oo ogolaanaya in lagu arko xubnaha ku jira gudaha uur ku jirta, qalabka ultrasoundku waa mid la heli karo (accessible), aan galin gudaha jirka (non-invasive), aan shoocaac lahayn (non-irradiant), aan qaali ahayn (inexpensive), laguna celcelin karo (repetitive), marka la isticmaalayo qalabka ultrasoundka bukaanku waa inuu Neefta isku celiyaa, dhaqdhaqaaqna uu san samayn.

1. The Liver (Beerka)

Beebrku waa xubin shaqadeediisu muhiim tahay una Qaabaysan Nudo is Gudgudbaaya.

Beerka Caadigaa Waa Normoechoic (midab Madow Ah).

Baaritanka Beerku Wuxuu Kabilowdaa in Qofka Loo Seexiyo Dhabarka loona Jan jeeriyo dhinaca Bidix .

Marka Baaritaanka Loo Adegsanaayo Qalabka **Ultrasoundka** Bukaanku Waan inuu Neefta isku Celiyaa Daqiiqado. Convex transducer Jabaq noqoshada loo isticmaalo Beerka waa 2-5 Mhz.

Waa in la isticmaalo jabqnoqosho Hoose si loo helo Gudbitaan Wanaagsan.

Marka labaarayo oo gada sare e Beerka waa in la isticmaalaa linear Transducer kaasoo jabaq Noqoshadiisu tahay mid sare 4-8Mhz.

Marka Loo eego Qaybaha Yar yar ee ka Dhex Shaqeeya Beerka Waxaa Loo kala saaraa 8 qaybood

(8 segments) Marka Lafiiiriyo Qaab Dhererka Beerka waxaa ka gudba 3 Aroore oo beerku lee yahay

(three hepatic veins). Marka la eego Qaab Baldhaca Beerka waxaa ka gudba labdada Qaybood ee Arooraha Wayn (portal bifurcation) waxaana kala qaybiya qaybaha sare (upper segments) ee Beerka waxayna sameeyaan Qeebta Hoose.

Qeebta dambe (caudate lobe) segment waxay kala qaybisaa labadii Qaybood ee aan Horay usoo sheegnay. Gadaal waxaa ka xiga (Inferior Vena Cava) Harayna Waxaa ka xiga Xajiyaha Arooraha (venous ligament). Qeebta Weyn Ee Bidixda Beerka Waxaa Kujira qaybta yar ee labaad (segment II superiorly) iyo Qaybta Sadexaad ee Hoose (segment III inferiorly).

Qaybta Wayn Ee Midigta Beerka waxaa Mara Arooraha Bidix Ee Beerka (left HV) .

Qaybta yar Ee Afraad waxay Kutaal Inta U dhaxaysa Arooraha Bidix Ee Beerka (left HV) iyo Arooraha Dhexe Ee Beerka (middle HV) .

Qaybaha Yar yar Ee 5aad iyo 8aad Waxay u dhexeeyaan Arooraha Dhexe iyo Arooraha Midig Ee Beerka. (middle and the right HV) .

Dhinaca Arooraha Midig Waxaa Laga Helaa Qaybaha Yar Yar ee Dambe Sida Qaybta Sare ee 7aad iyo Qaybta Hoose ee 6aad.

1.1 Habka loo Arko Beerka iyo Xubnaha Laxariira:

- Qaybta Wayn Ee Midigta Beerka oo Ka Kooban Qaybaha Yar Yar 7aad iyo 8aad Waxay Xiriir La Lee yihiin Muruqa U dhexeeya Feeraha iyo Caloosha (diaphragm).
- Qaybta Yar Ee 6aad waxay xiriir la leedahay Kilida Midig (right kidney).
- Qaybta Wayn Ee Gadaale Waxaa loo Baaraa Habka toosan (sagital section).
- Habka Dadban Xameetida Waxaa Ku Wareegsan Qaybaha Yar Yar Ee 4 aad , 5aad iyo 6aad.

□ Habka Dadban Qaybta Sare ee uur Kujirta Waxaa Laga Helaa Qaybaha Yar Yar Ee 5aad , 7aad ,8aad. Waxay Daboolaan inferior Vena cava.



Fig. 2. Normal liver




Fig. 9. Liver segmentation

1.2 Acute hepatitis (Cagarshow Cusub ee Kudhaca Beerka)

Waa jiro cusub oo ku Dhacda Beerka Waxayna Caan Kutahay Inuu Siyaado Dheecaanka Loo Yaqaan (Aminotransferases) Qaas Ahaan GPT gu Marka uu 10 Jeer Kabato Sidiid Caadiga Ahayd.

Fayrusyada Keena Cagaarshowga Cusub ee Beerka Waxaa Ugu Caaansan Fayrusyada Kudhaca Beerka Waqtiyada Kulul Sida (Fayrusyada keena Cagarshowyada A, B,C iyo E Virus)

Ama Fayrusyo Kale Sida (herpes virus, Epstein-Barr virus or cytomegalus virus).

Waxaa Kaloo Keeni Kara Cagaarshowga Cusub Ee Beerka Cabida Alkolada iyo Daawooyinka Dadku Ku sumoobo toxic drugs (Paracetamol, Halotan, etc).

Ultrasoundku ma muujiyo Cagaarshowga Cusub ee Beerka .

Qofka Qaba Cagaarshowga Cusub markii lasaaro Ultrasoundka Dhamaan Beerkiisu Waa Caadi.

80% Dadka Qaba Cagaarshowga Cusub ee Beerka Waxaa Lagu Arkaa **Ultrasounka** Barar Kujira Xameetida (gallbladder wall edema) waxaana Sababa Albumiinka oo Yaraada

(hypoalbuminemia) inta badan waxaa lagu Arkaa Dadka Da'da Yar (young person). Mararka Qaarkood Waxaa La Arkaa xanuun beerka Kubaahsan oo ay sababtay Biyo Kujira Beerka (hepatic edema) iyo Beerka yarada oo waynaatay (splenomegaly).




Fig. 1. Thickened and doubled wall in acute hepatitis

1.3. Chronic hepatitis (Cagaarshow Dahay)

Waa Cudur Daahay oo Keena Caabuuq Ku dhaca Beerka Waxaana Sababa Cudur Dhaliyaal Kala Duwan, Wuxxuna Soomuuqdaa ugu Yaraan Mudo 6bilood Ah, asagoon lahayn Raysasho Ayna Lasocdaan Dhimashada iyo Yaraan shada Unugyada Beerka.

Cagaarshowga Soo Daahay eek u dhaca Beerka waxaa lagu arkaa Burbur Kudhaca unugyada Beerka

(cytolysis syndrome).

Baritaanka **Ultrasounka** Masheego wax Calaamad oo Lagu yaqaan Cagaarshowga Soo Daahay,

50% Dadka Qaba Cagarshowga Soo Daahay Calaamada Lagu Yaqaan Waa Beerka Yarada oo Waynaata (splenomegaly up to 13-14 cm). **Ultrasoundka** Uur kujirtu Masheego Cadaymo Rasmi Ah ee Kusaabsan Cagaarshowga Soo Daahay, sidaa

Darteed **Ultrasoundka** Wxaa Loo isticmaalaa in Lagu Doorto Meesha Cadka Beerka Lagasoo Jaraayo (hepatic biopsy) Si Baartaan Caafimaad Loogu sameeyo Waan in Lala Socda Dadka Qaba Cagarshowga 6bilood oo kasta. Baaritaanka **Ultrasoundka** ee Cagaarshowga Soo Daahay waa mid xaddidan (limited value) Kaliya Wuxuu Sheegaa Beerka Yarada oo Waynaata iyo Xajiya yaasha Beerka Iyo Qaybta Saree e Xiidmaha oo Bararta (splenomegaly and hepato-duodenal ligament adenopathies).




Fig. 2. Splenomegaly in a patient with chronic hepatitis C (longitudinal diameter 15 cm)

1.4 Hepatic steatosis (Beer Xayrow)

Beer Xayrowga Waxaa Lagu Qeexaa Baruur Ka Buuxsantay Beerka oo Kabadan 10%. Waxyaabaha ugu waa wayn (main causes) ee sababa Beer xayrowga waxaa Kamid Ah :

A. Muda dheer oo la cabo Alkolada (alcoholic steatohepatitis – ASH syndrome)

B. Cayilka Badan (obesity)

C. Sonkorow (diabetes)

D.Dufanka Badan dyslipidemia (non-alcoholic steatohepatitis – NASH syndrome).

Waxaa Kaloo Beer Xayrowga Sababi Kara Cagaarshowga Nuuca C (hepatitis C virus).

90% **Ultrasoundka** Waxaa Si Fudud oo Xaqiiqa Loogu ogaan Karaa Beer Xayrowga.

Ultrasoundku wuxuu Muujiyaa Beerka oo Cadan Kujiro "bright liver" Marka Labarbar dhigo Ama Loo eego Unugyada Kalida.

Nuucyada Beer Xayrowga :

- A. Beerxayrowga Fudud (mild steatosis)
- B. Beerxayrowga meel Dhexaadkaa (moderate steatosis)
- C. Beerxayrowga aadka u Daran (severe steatosis).

Marka La Adegsado Qalabka **Ultrasoundka** Unugyada Beerka Waxaa Kasoo Muuqda Jabaqyo Kala Duwan sida

A. fatty-free Baruurta aan xadidnayn ee Beerka waxay muujisaa Humag madow (hypoechoic areas).

B. focal steatosis Barta Beer Xayrowga waxay Muujisaa Humaag Cadaan Ah (hyperechoic).

Conclusion (Gabangabo)

Ultrasoundka waa Habka Ugu Wanagsan ee lagu Ogaado Beerxayrowga (non-invasive technique).Sidoo Kale Ultrasoundka Waxaa Si Sahlan loogu Xaqiijinkaraa Bar Xayrowga Beerka (focal hepatic steatosis) iyo Baruurta aan Xadidnayn ee Beerka (fatty free).



Fig. 11. Fatty-free area in the right lobe



Fig. 12. Fatty-free are in the left lobe

1.5 Liver cirrhosis

Waa Heerka Ugu Dambeeya cudurada Daaha ee Beerka Ku Dhaca, Kuwaas oo Ku bilowda Bubur iyo isbedelo Ku dhaca Unugyada Beerka Kadibna Waxaa Ka Dhasha Kuus kuusyo Ka samaysan unugyada Beerka oo Dhintay.

Waxyaabaha keena Dhimashada unugyada Beerka 90% Waxaa Masuul Ka Ah Cabidda Alkolada , Cagarshowga B & C. Kiisaska Qaarkoodna Waxaa Keena Difaaca Qofka OO si Qaldan U burburiya Unugyada Beerka.

Burburka Unugyada Beerka Marka La Adegsado Qalabka **Ultrasoundka** waxaa Lagu Arkaa Biyo Kujira Xuubka Sare ee Caloosha (ascites).

A. Caudate lobe hypertrophy (Qaybta Dambe ee Beerka oo Weynaata).

B. splenomegaly (Beerka Yarada oo Weynaata)

C. ascites (Xuubka Saree e Caloosha oo Biyo Galaan).

A. Caudate lobe hypertrophy (Qaybta Dambe ee Beerka oo Weynaata) iyo qaybta Yar ee Koowaad ee Kujir Qaybta Weyn ee Gadaale oo Beerka Waa ay Waynaataa inta uu jiro burburka beerka,

B. splenomegaly (Beerka Yarada oo Weynaata) 80% Kiisaska Qaba Burburka beerka (liver cirrhosis) Beerkayaradu way kawaynaataa 12cm marka loo cabrio Dhererka, Bukaana Qaba Weynaashada Beerka Yarada waxay aad uga daran yihiin Kuwa Qaba Cagaarshowga soo Daahay,Waynaashada Beerkayaradu waxay kabadata 15cm,

Marka Beerka Yarahuu uu Kaweynaato (Splenomegaly) 18 ama 20cm waxay Sababtaa Cudurada Kudhaca Dhiiga Sida :

A. Xinjirowga Dhiiga oo Xumaada (thrombocytopenia<100,000/mm³).

B. Unugyada Cadcad oo Yaraada (leucopenia < 3000/mm³) .

C. Unuyada Cascas oo hoos u dhaca (anemia).

C. ascites (Xuubka Saree e Caloosha oo Biyo Galaan).

Ultrasoundka Waa aaladda Ugu Muhiimsan ee Lagu ogaado Inay biyo kujiraan xuubka sare ee caloosha (Ascites) biyahaasna waxaa inta badan lagu arkaa Bukaanka Qaba Burburka Beerka (decompensated cirrhosis), **Ultrasoundka** Waxaa Lagu Ogaadaa

(volume of ascites) Muga Biyaha Kujira Xuubka Sare ee caloosha iyo in lagu qiimeeyo xilliga uu Qaadanayo Daawooyin Kaadi badiyaasha ah (diuretic therapy),

(ascites volume) Muaga Biyaha ku jira xuubka sare ee caloosha waxaa loo qaybiyaa 4 Nuuc:

A. inta ugu yar Muga Biyaha Biyaha ku jira xubka sare ee caloosha (minimal ascites 1-2kg).

B. Muga Biyaha yar ee kujira xuubka sare ee caloosha waxay gaaran (3-4 kg).

C. Muga Biyaha dhexe ee gala xubka sare ee caloosha wuxu Gaaraa (moderate ascites 7-8 kg)

D. Biyaha ugu Badan ee Gala xuubka Sare ee caloosha Waxay gaaraan (10-15 kg).

Muuqaalka **Ultrasounka** ee Biyaha kujira xuubka sare ee caloosha wuxuu u muuqdaa Sawir madow (anechoic image).




Fig. 24. Moderate perihepatic ascites
Intestinal loops “float” in the ascites



Fig. 25. Large ascites in the Douglas space



**Fig. 14. Normal caudate lobe (31 mm)
in liver cirrhosis**



**Fig. 15. Enlarged caudate lobe (39 mm)
in liver cirrhosis**

Cutubka 2aad.

**Abdominal ultrasound in the diagnosis focal liver
lesions – fluid lesions**

**Ultrasoundka uurjirta Waxaa Lagu Baaraa Nabraha Kuus Kuusan
Iyo Biyaha Kujira Beerka.**

Ultrasound ka uur Kujirta Waa Habka koowaad ee sawirka looga Qaado Dadka Ka cabanaya Xanuunada Sida Jug ku dhacday uur ku jirta (abdominal trauma) Taasoo keenta Nabro Kuus kuusan oo lagu Arko Beerka, Sidoo kale **Ultrasound** ku Wuxuu Sheegaa Biyo Gala Tubooyinka Beerka (biliary cysts) iyo Biyaha Ay keenaan Gooryaanada ku dhaca Beerka.

Qaybta soo Socota Waxaan Uga Hadli Doonaa Nabraha Kuuskusan oo Biyuhu Kujiran ee Beerka (focal liver fluid lesions) sida

- A. Biyo Fudud oo kujira Beerka (simple hepatic cyst).
- B. Biyo Badan oo kujira Beerka (polycystic liver).
- C. Gooryaanka biyaha Beerka(Hydatid hepatic cysts)
- D. Maal Kujirta Beerka (liver abscess).

A. Biyo Fudud oo kujira Beerka (simple hepatic cyst).

3% dadka loo sameeyey Baaritaanka Ultrasoundka waxaa Biyo Fudud oo ku jira lagu arkaa Beerka, Biyahaas oo Aysan Sababin Ku dulnoole (non-parasitic), Wax Calaad ah Malahan Biyaha Fudud ee kujira beerka, Kiisas Aadn uyar ayaa lagu Arkaa calaadaha soo socda

A. Raaxa La,aan (discomfort) B. Xanuun Kajira Dhinaca Sare ee midig kaasoo Ay Sababeen Biyo Badan oo Kujira Dhinaca Midig, Marka La Adegsado **Ultrasoundka** Biyaha Kujira Beerka Waxay u muuqdaan Si caadiya, Nabraha Yar yar ee Madow Laguma Arko Ultrasoundka Sababtoo ah Waxaa Ku wareegsan Lakab Nudo Ah (epithelial layer),Biyaha Kujira Beerka Waxay U qaabaysanyihiin Qaab Wareeg ah (round) ama Qaab Ukumeed (oval).




Fig. 1 and Fig. 2. Simple liver cyst: anechoic lesion with thin wall and posterior enhancement

B. Biyo Badan oo kujira Beerka (polycystic liver).

Waa Cudur lagu Dhasho kaas oo can ku ah Biyo Meelo kala duwan uga jira Beerka kuwasoo Ay lasocdaan Biyo badan oo kilyaha meelo kala duwan uga jira, Cudurada lagu dhasho waxaa la iskugu Gudbiyaa dhaxal muuqda (dominant autosomal transmission), intabadan Cuduradaas waxaa lagu ogaadaa **Ultrasound** Joogto Ah, Dadka Qaba cuduradaas wax calaamada (asymptomatic) laguma Arko, **Muuqaalka Ultrasoundku** waxuu si sax ah u sheegaa in biyo badani ku jiraan Beerka kuwaasoo u muuqda Qaab Wareeg ah (round) ama Qaab Ukumeed (oval). Ultrasounka caalamiga ha wuxuu si dhamaystiran u sheegaa in biyaha ku jira Beerka Ay u muuqdaan Mugdi Ama Madow (anechoic) Unugyada Beer Kuna Waxay u muuqdaan caadi, Haddii Aysan Biyo badani ku jirin kilyaha Biyaha kujira beerka wax dhib ah malaha, Isla waqtigaasna wax calaamad shaqagab beerka ah majiraan (no signs of liver failure) Biyaha badan ee kujira beerka Wax daaweeyn ah uma baahna (does not require treatment), Haddii kiisaska Qaar Lagu Arko calaamado soo muuqda oo Cadaadiska Biyahu ay Bateen Biyaha Ayaal Meesha Lasara iyadoo La adeegsanaayo Hagida **ultrasounka** iyo (fine needle aspiration) cirbadaha cabirkoodu yahay 0.6-0.7mm.



Fig. 10. Polycystic liver




Fig. 11. Polycystic liver

C. Gooryaanka biyaha Beerka(Hydatid hepatic cysts)

Waa biyo Gooryaameed uu sababay gooryaanka loo yaqaan (Echinococcus granulosus),

Habka Gooryaanku u Galo Jirka Waa: Ukunta Gooryaanka oo si lama filaan ah Dadku u laqaan,taasi oo kusoo Gudubta Gacmaha oo wasaqaysan(dirty hands) iyo Cudaarta aan si fiican loo dhaqin (incompletely washed vegetables) kadibna Ukunta Gooryaanku waxay u gubtaa xiidmaha iyo xididdada waa weyn ee dhiigga sidaas ayeyna ku gaartaa beerka, Meesha Uguweyn ee Gooryaankaasi Dego waa Beerka boqol kiiba 60% kiiska la arkay(in approximately 60% of the cases).waxaana soo raaca Sanbabaha boqol kiiba 20%(approximately 20%). Gooryaanka Biyaha Beerka Wax calamad ah malahan laakiin Gooryaan Biyoodkaan wuxuu keeni karaa Dhibaatooyin aad udaran Sida xasaasiyad daran (anaphylactic shock) Biyihii Gooryaanka oo dilaaca(cyst rupture) kadibna gala Tubooyinka Beerka iyo xameetida sidaas ayeyna ku xiraan Tubooyinkaas waxaana kadhasha Midabka Jaalada Ah (jaundice).

Muuqaalka **Ultrasounka** ee biyaha gooryaanku keenay kala duwanaantoodu waxay ku xiran tahay inta biyahasi jireen,

Ultrasounka iyo Nuucyada Biyaha Gooryaanka: Marka La adeegsado Qalabka Ultrasoundka Biyaha Gooryaanka ee ku jira beerka waxaa loo kala qaybiyaa 5 Qaybood:

A. biyaha Gooryaanku Waxay u muuqdaan Madow(anechoic) marka la adeegsado aalada **Ultrasoundka** .

B. Ultrasoundku wuxuu muujiyaa in biyaha Gooryaanku Kabaxaan xuubka weyn ee gooryaanka.

C. biyaha gooryaanku way kala goo go an yihiin ayagoo leh muuqaalo kala duwan.

D. Nudaha Gooryaanku waxay u muuqdaan qaab kooladoo kale ah taasoo ay keentay Biyihii gooryaanka oo yaraaday kadibna Gooryaanadii waxay isku badaleen Adke(solid).

E. gooryaan Biyood yadii hore waxay isku badali jireen dhagax , **Ultrasoundku** wuxuu soo muujin jiray derbi gooryaan oo cad (hyperechoic), gooryaankaas oo qaybta gadaale ku sameeyey Hoos , Hooskaas waxaa loo yaqaan ”the shell sign”.



Fig. 15. Hydatid cyst with detached proligerous membrane



Fig. 16.Hydatid matrix

D. Maal Kujirta Beerka (liver abscess).

Waa maal ku aruurtay Gudaha hoose ee beerka, Calaamadaha lagu arko bukaanka ay beerka malaxdu uga jirto waa Qandho iyo Jarays. Marka la isticmaalo **Ultrasoundka** caalamiga ah waxaa lagu arkaa wax kuusan oo madow waxaana laga yaaba in kuus kuus kaasi madow gadaal ku sameeyaan(posterior enhancement), Malaxda beerka kujirtaa ma wada saamayso Beerka oo dhan, Malaxda beerku waxay noqon kartaa mid badan (multiple), Mid isku xirxiran(communicating) iyo mid aan intaasba ahayn.

SonoVue waa Walax laga isticmaalo Xididka taasoo muujinaysa in sawirada **ultrasounku** si fiican u muuqdaan, Ultrasoundka waxaa lagu kala saaraa cudurada , markii lawaayo calaamad sax ah.

Ultrasounku Wuxuu Malaxda beerka kujirta ka saaraa ama kaduwaa Cudurada soo socda:Dhiig ka buuxsama Beeka (liver hematoma),Buro ku jirta Beerka(liver tumors),Nuuca 2aad ee gooryaan biyoodka beerka(type II hepatic hydatid cyst), Marka Larabo in lasoo saaro malaxda Ku jirta Beerka,Baaritaanka(the diagnostic) iyo Daawaynta(therapeutic) Waxaa haga Qalabka **Ultrasoundka**,kadib cirbad Ayaa lageliyaa Meesha Maashu ku jirto Waxaana Laga soo dhuuqaa Malaxda Kujirta Beerka,waxaa kaloo la isticmaali karaa Tubo Cabirkeedu yahay (3-5mm) taasoo la dhigaayo Hagitaanka **Ultrasounku** Hoostiisa Kadibna Waxaa Lasoo Qaadaa Malaxdii ku jirtay Beerka.



Fig. 20. Liver abscess



Fig. 21. Liver abscess

Cutubka 3aad.

**Abdominal ultrasound in the diagnosis of focal
liver lesions – solid lesions**

**Ultrasoundka uurjirta Waxaa Lagu Baaraa Nabraha Kuus
Kuusan Iyo Adkaha Kujira Beerka.**

Cutubkaan Waxaan uga Hadlaynaa Nabraha Adka Ah ee Beerka Kudhaca,Marka laad waxaan Baranaynaa Burroyinka aan Faafin(benign masses) iyo Burooyinka Faafa(malignant), Burooyinkaas Waxaa kala saara Qalabka **Ultrasoundka**,Baaritaanka Ugu Dambeeya ee Cadka larabo in lagasoo jaro Beerka Waxaa lagu Hagua **Ultrasoundka**(ultrasound guided).

1. **Benign hepatic tumors(Burooyinka Beerka ee aan Faafin)**

A. Hepatic hemangioma(Burada ku dhacda xididdada Beerka)

Waa xiddido si Qaldan U samaysmay oo asalkoodu ka yimid Koox tiiftaafyo ah iyo miiqaq kala duwan , waa Burada ugu caansan Burooyinkan aan faafi ee kudhaca Beerka Waxayna Noqon karaan 1Hal hal(single) Ama Kabadan(multiple),waxayna aad ugu badantahay Haweenka marka loo eego Ragga,(women than in men) (ratio 5:1) inta badan Burada ku dhacda xididdada beerka Guud ahaan wax calaamada malaha(asymptomatic), Waxaana si joogta ah loogu baaraa **Ultrasoundka**,Burooyinka ku dhaca Xididdada Dhiiga waxaa loo kala saaraa 2ba qaybood: **A.**Burooyin caadiga ah ee u dhaca xididdada dhiiga(“normal” hemangiomas) cabirkooduna yahay(5cm) **B.**Burooyinka aan caadiga ahayn(cavernous angiomas)ee kasamysmay xidido aan fiicnayn (cabirkooduna yahay5cm) waxayna can kuyihiin Socodka dhiiga oo yaraada,90%kiisas lagu arko Burooyinka ku dhaca xididdada Beerka waxaa lagu xaqiijiyaa Kumbuyuutarka uur ku jirta(**Ultrasoundka**),Muuqaalka kumbuyuutarka uur kujirta(**ultrasound**)soo saaro waa Cadaan(hyperechoic).

Ultrasoundku Wuxuu Burada ku dhacda xididdada Beerka ka saaraa ama kaduwaa Cudurada soo socda: **A.** kasnasarka ku faafa beerka (liver metastases) **B.** Burada aan faafin ee ku dhacda Beerka(hepatic adenoma).



Fig. 1. Typical hemangioma with imprinting of PV



Fig. 2. Typical hemangioma

b. Hepatic adenoma(Burada Beerka ee aan Faafin)

waa Burada aan faafin ee beerka kudhacda oo mar mar la arko,Asal ahaan waxay ka timaada Unugyada Beerka(hepatocytes) Ama tubooyinka beerka Beerka kasoo qaada Dheecaanka.

Buradaan aan faafin ee beerka ku dhacda 90% waxaa lagu arkaa Haweenka(women) isticmaala Dawooyin ilma kala dheeraynta(oral contraceptives),waxaana kadhasha dhibaatooyin ay ka mid yihiin Burbur ku dhaca Unugyada Beerka(necrosis),Dhiigbax lagu arko Gudaha Beerka(intrahepatic bleeding),Dhiig ku aruura Xuubka Sare ee uur kujirta(hemoperitoneum).



Fig. 8. Slightly hyperechoic hepatic adenoma



Fig. 9. Hypoechoic hepatic adenoma

Kumbuyuutarka uur kujirta(**ultrasound**) si cad uma muujiyo Buradaan aan faafin ee beerka ku dhacda,marmarka qaan Ultrasounku wuxuu muujiyaa muqaal Cadaan Ah(hyperechoic),

C. Focal nodular hyperplasia FNH (Burada Kuusan ee Beerka)

Waa burada aan faafin ee ku dhacda beerka waana mida 2aad ee ugu badan Burooyinka ku dhaca Beerka Halka middii 1aad ay ahayd (Burada ku dhacda xididada Beerka), Bulshada 3% ayey ku dhacdaa Buradaani(3% of the population),waxayna kubadantahay Dumarka marka loo eego Ragga,4haweena markay ku dhacdo 1nin ayey kudhacdaa(more common in women than in men (ratio 4:1),Waxaana keena inay dumar ku badato daawooyin ilma kala dheeraynta oo waqti dheer la isticmaalo(chronic oral contraceptives),Buradan kuusan ee beerka ku dhacda inta badan calaamado malahan(asymptomatic),Kumbuyuutarka uur kujirtu(**ultrasound**)waxuu muujiyaa muuqaalo isku eg(isoechoic). Kiisaska kala gooya Qaadashada Daawada ilma kala dheeraynta(oral contraceptives) isla markaana Qaba Burada kuusan ee beerka waxa lagula socdaa Kumbuyuutarka uur ku jirta (Ultrasound).




Fig. 12. FNH – isoechoic, inhomogeneous nodule




Fig. 13. FNH – hypoechoic nodule on a fatty liver

2. Malignant hepatic tumors(kansarka Beerka)

Kansarka ugu badan ee ku dhaca beerka waxaa kamid ah:

A. kansarka aas aaska u ah burooyinka beerka(hepatocellular carcinoma)

B.Kansarka ku dhaca tubooyinka beerka(cholangiocarcinoma)

c.Kansar bureedka ku faafa beerka(liver metastases)

Aadbay u adagtahay in go,aan lagu gaaro muuqaalka kumbuyutarka uur kujirta(**ultrasound**) kaliya,Hadii burooyinkaasi yihiin kuwa aan faafin iyo kuwa kansarka ah,Waa adagtahay in Kuumbuyuutarka uur kujirta(ultrasound) lagu kala saaro burooyinka beerka ka dhasha iyo burooyinka meelaha kale ka yimaada.

A. kansarka aas aaska u ah burooyinka beerka (hepatocellular carcinoma HCC)

Waa kansarkii ugu horeeyey uguna badnaa ee kudhaca beerka ee 75-85%,kansarkaasi wuxuu kabilowdaa Unugyada beerka oo burburay,94% kiisaska lagu arkay ee kansarka aas aaska u ah beerka waxaa keena Burburka unugyada beerka,Mararka qaarna waxaa keena Cagaarshow daran oo waqti dheer qofka soo hayey(chronic viral hepatitis),Cagaarshowga ay keentay alkolada waqtiga dheer la isticmaalayey(alcoholic hepatitis)Birta dhiiga oo badata(hemochromatosis)Hadii uu kordho Barootiinka beerka ee loo yaqaan(alpha fetoprotein (AFP)uuna Kabato(200-400 ng/ml)taasoo cadayn un ah inuu jiro kansarka aas aaska u ah Burooyinka Beerka,Muuqaalka kumbuyuutarka uur kujirta(**ultrasoundka**) caalamiga ah ee lagu arko burada Aas aaska u ah burooyinka beerka kumbuyuutarka uur kujitu (**ultrasound**) wuxuu soo muujiyaa midab mugdi ah(hypoechoic),midab cadaan ah(hyperechoic),Midab isku eg(isoechoic),Markii ay yartahay Burada aas aaska u ah Burooyinka Beerka kumbuyuutarka uur kujirta (**ultrasound**)waxaa lagu arkaa midab madow(hypoechoic)haddii ay Buradaasi weyn tahay oo ay ka badan tahay 5-7cm beerku wuxuu u muuqdaa mid aan isku ekayn(inhomogeneous)waxaana sababay Burburka unugyada beerka iyo dhiigbax la socda,Dadka Qaba Burada aas aaska u ah Burooyinka Beerka 6billod oo kasta waxaa lagu baaraa Qalabka **ultrasoundka** ayadoo la raacinayo in la hubiyo dheecaanka beer ee loo yaqaan(alpha fetoprotein).



Fig. 21. Hypoechoic HCC




Fig. 22. Isoechoic, inhomogeneous HCC

B.Kansarka ku dhaca tubooyinka beerka(cholangiocarcinoma)

Waa buro ka bilaabata Xuubka Sare ee Tubooyinka Beerka waana Dhif dhif,Marka 15qof laga helo kansarka aas aaska u ah burooyinka beerka waxaa 1qof laga helaa burada ku dhacda tubooyinka beerka(the HCC/cholangiocarcinoma ratio is approximately 15:1.),Marka loo eego Meesha ay kutaal Buradaani waxaa loo qeybiyaa 3nuuc:

A. Kansarka geesaha tubooyinka(peripheral (cholangiolar carcinoma),**B.**Kansarka Gudaha tubooyinka(hilar Klatskin tumor),**C.**Kansarka kudhaca tubooyinka kuyaal banaanka beerka(extrahepatic (choledocal tumor).

A. Kansarka geesaha tubooyinka(peripheral (cholangiolar carcinoma),marka la adeegsado qalabka **ultrasoundku** wuxuu soo muujiyaa midabka burada oo madow ah(hypoechoic tumor)sida “bulls-eye tumor”.

B.Kasarka Gudaha tubooyinka(hilar Klatskin tumor) waa adagtahay in lagu ogaado kumbuyuutarka uur kujirta(**ultrasound**) sababtoo ah waa buro aad u yar waxaana si fudud loogu arkaa(MRCP (magnetic resonance cholangiopancreatography) or ERCP (endoscopic retrograde cholangiopancreatography), kumbuyuutarka uur kujirta(**Ultrasound**)laguma ogaan karo kansarka ku dhaca tubooyinka beerka,lkn wuxuu muujinkaraa Qayb kamida kansarkaas,waxaana lagu xaqiijiyaa(MRCP

(magnetic resonance cholangiopancreatography) or ERCP (endoscopic retrograde cholangiopancreatography).



Klatskin tumor with upstream dilatation of intrahepatic biliary ducts

C.Kansar bureedka ku faafa beerka(liver metastases)

Waa kansar Qatar Ah oo ku faafa beerka waana hal kansar ama in kabadan kuwaasoo ka yimaada xubnaha kale ee jirka,waxaana ka mida xubnaha uu ka yimaado: kansarka ka yimaada malawadka(colorectal cancer),Kansarka ka yimaada tubooyinka neef mareenka(small cell bronchial carcinoma),kansarka ka yimaada caloosha(gastric carcinoma),kansarka ka yimaada ganaca(pancreatic carcinoma),kansarka ka yimaada naasaha(breast carcinoma),kansarka ka yimaada kilyaha(renal tumors).kumbuyuutarka uur ku jirta(**ultasound**)waxaa lagu baaraa burooyinka looga shakisanyahay inay faafaan,kumbuyuutarka uur kujirta(**ultrasound**)waxaa si joogta ah loogu baaraa Burooyinkaas,Qalabka **ultrasoundku** si cad uma muujiyo burooyinka faafa waxaana la arkaa humaag madow ah (hypoechoic) ama humaag cad(hyperechoic),dadka qaata dawooyinka kansar(chemotherapy)waxaa lagu baaraa kumbuyuutarka(**ultrasound**)caalamiga ah ayadoo lagu oganaayo unigyada kansarka ee burburay waxaana soo muuqanaaya humaag madow ah(hypoechoic or transonic).



Fig. 30. Hypoechoic metastases



Fig. 31. Hyperechoic metastasis

Cutubka 4aad.

**Ultrasound of the gallbladder and biliary tree
(ultrasoundka xameetida iyo tubooyinka).**

1. The gallbladder(Xameeti).

Xameetidu waa Meesha ugu badan oo ay ka cabtaan bukanada ka xanuunsan uur ku jirta,waana fududahay in lagu baaro ultrasoundka baaritaankana waxaa lagu sameeyaa dhinaca midig ee sararta hoosteeda waxaana loo sameeyaa qaab dadban iyo qaab toosan,marka lasamynaayo baaritaanka waxaa waajib ah in loo sameeyo si taxadar leh,si loo arko dhamaan xameetida,dhagaxa xameetida kujira waa mid dhaqdhaqaaq sameeya.

a) Normal gallbladder(Xameetida caadiga ah)

muuqaalka caadiga ah ee xameetida waa sida qaabka tufaaxa oo kale,dhexroorka caadiga ah ee xameetida wuxuu ka hooseeyaa 8/3cm,dhexroorka ugu sarreeyaana waa 10/4cm,dhumucda ugu sarraysana waa 4mm,waxaa muhiim ah in baaritaanka **ultrasoundka** ee xaameetida la sameeyo bukaanka oo aan 8saac wax cunin(fasting),hadii xameetida uu ka buuxo dheecaanka loo yaqaan Bileka,baaritaanka ultrasoundka waxaa si fiican loogu arkaa dhagaxa ku jira xameetida iyo dhaqdhaqaaqiisa.




Fig. 1. Normal gallbladder



Fig. 2. Postprandial contracted gallbladder

b) „Malformations” of the gallbladder(xameetida oo si qaldan u samaysantay).

Xameetida oo si qaldan u samaysanta qas ahaan markii xameetidu u ekaato 2ba kish oo yar yar ama sida dhibcaha oo kale,Qof ka aan qibrada badan u lahayn isticmaalka



ultrasoundka isbadalkaas ku dhacay xameetida wuxuu u maleeyaa inuu jiro Cudur sababay is badalkas.

c) Gallbladder polyps(kuus ku dhagan xameetida)

kuus kuus yada yar yar ee ku dheggan xameetida waxay can ku yihiin oo laga helaa xuubka hoose ee xameetida, inta badan kuus kuus yadaas waxaa sababa cholesterol, kuus kuus yadaas 5% waxaa lagu arkaa haweenka, 6% waxaa lagu arkaa raga, kuus kuusyadaas yar yar ee ku dheggan xameetida waxaa lagu ogaadaa **Ultrasoundka**, iyadoo bukaanku wax calaamada uusan lahayn (asymptomatic). **Cholesterol polyps** waa kuus kuusyo yar yar oo ay keentay dufanka oo dhiigga ku bata waxayna u muuqdaan wax cad (hyperechoic) oo ku dhagan darbiga xameetida, dhexroor koodana yahay 5mm.



Fig. 6. Cholesterol polyps



Fig. 7. Cholesterol polyps

d) Biliary sludge(shuruuruxa tubooyinka)

shurruraxa tubooyinka waxaa sameeya dheecaan adag + calcium +cholesterol oo isku qasan,waxayna noqdaan bilowga hore in uu dhagax ku samaysmo xameetida(gallstones). **Ultrasoundka** si caadi ah ayaa loogu arkaa shuruuraxa tubooyinka shuruuraxaasi wuxuu sameeya dhaq dhaqaaq laakiin Hoos maleh.




Fig. 8. Biliary sludge with horizontal level



Fig. 9. "Hepatization" of the gallbladder

e) Cholelithiasis(Dhagaxa xameetida)

waa dhagax ka samaysmay cholesterol/Dufan ama calcium oo ku jira xameetida, waa xaalad caam ah, oo laga helo 20% Bulshada,waxaana saamayn ku leh,Hida sida yaasha(genetic),Cayilka Badan(obesity) iyo Son korowga(diabetes). Dhamaan bukaanada dhagaxu ku jiro xameetida lagama wada saaro(cholecystectomy),dhagaxa aan wax caalamada lahayn waa in lala socdaa.**Ultrasoundka** waxaa lagu arkaa dhagaxa ku jira Xameetida,ultrasoundka lasaaro uur kujirta(**Transabdominal ultrasound**) waa midka ugu fiican ee lagu arko midabka caddaan kaa(hyperechoic)iyo hooska gadale ee dhagaxa(posterior shadow),ultrasoundka waxaa lagu ogaadaa in dhagaxa xameetida kun jira uu yahay 1dhagax(single) ama dhagxaan badan(multiple lithiasis).



Fig. 15. Single gallstone



Fig. 16. Three gallstones

f) Acute cholecystitis(caabuqa cusub ee xameetida)

Waa caabuq cusub oo ku dhaca wareega xameetida,waxa ugu badan ee sababa caabuqaas waa tubooyin oo dhagax ku samaysmay(biliary lithiasis),mararka qaarna



Fig. 21, 22. Acute cholecystitis – thickened and duplicated gallbladder wall

waxaa keena caabuqa cusub ee xameetida bacteriada ay ka mid yihiin, salmonella ,E.coli,streptococcus. Sidoo kale mararka qaar waxaa keeni kara Xididada dhiiga oo xirma. Baaritaanka caabuqa cusub ee xameetida waxaa kaa caawinaaya wax yaabaha soo socda,Bukaanka oo xanuun badan ka dareema dhinaca midig ee hoose,Qandho iyo jarays. Baaritaanka xanuunka waxaa la isticmaalaa Taabasho(palpation) dhinaca midig ee hoose waxaana loo yaqaan (Murphy’s sign), muu qaalka **ultrasoundka** ee caabuqa cusub ee xameetida waa adkaan shaha wareega xameetida,cabirka caadiga ah ee xameetidu waa 4mm,laakin caabuqa cusub ee xameetida waxaa barar lagu arkaa wareega xameetida cabirkiisuna waa 10mm,wareega xameetida oo waynaada waxaa loo yaqaan “sandwich”.

g) Chronic cholecystitis(Caabuqa daahay ee xameetida) waxaa loo yaqaan wareega xameetida oo dhagax kujirey waqti dheer,muuqaalka **ultrasoundka** waxa lagu arka wareega xametida oo adkaada cabirkeeduna ka bato 4mm,waxan ultrasoundka lagu arkaa midab cadaan ah.

h) Gallbladder carcinoma(kansarka xameetida).



Fig. 25. Chronic lithiasic cholecystitis: thick, hyperechoic gallbladder wall

Waa cudur ku dhaca dad badan oo horay u qabay dhagaxa xameetida, cudurkaani wuxuu ku badanyahay dadka dadoodu tahay 70 ka sano, nasiib daro kansarkaan waxaa la ogaadaa waqti dambe, mararka qaar koodna waxaa si kedis ah loogu ogaadaa **ultrasoundka** marka laga shakiyo kansarka waa in cabirka xameetidu ka waynaadaa 20mm marka lagu cabiro gudbiyaha ultrasoundka.



Fig. 29. Advances gallbladder carcinoma, with invasion of the adjacent liver. Ultrasound aspect of a hypoechoic area centered by a calculus.



Fig. 30. Advanced gallbladder carcinoma. Hypoechoic mass centered by a calculus. Carcinomatous ascites (top right)

2. Ultrasound of the biliary tree (ultrasoundka Tubooyinka)

a) Normal aspects (muuqaalka caadigaa).

the main biliary duct (MBD) waxaa lagu baaraa ayadoo lasamaynaayo cabirka tubooyinka ee caadiga ah kaas oo ah 5-6mm.

a) Obstructive jaundice with high level obstruction (Tubooyin oo xirma).

Tubooyinka ugu badan ee xirma waa inay ku balaartan beerka dhexdiisa, waana la arki karaa in ay tahay qayb kamid ah beerka ama beerka oo dhan waxa ugu badan ee keena xirnaa shaha tubooyinka waa Kansarka ku dhaca Xameetida ama Beerka, **ultrasoundka** la saaro Tubooyinka ku dhex jira beerka wuxu muujiyaa Midab cadaan ah (hyperechoic).

Cutubka 5aad

Ultrasound of the kidneys (ultrasoundka Kilyaha)



Fig. 31. Dilated intrahepatic bile ducts – "spider-like" appearance

1. Normal kidneys(kaliyaha caadigaa)

Waqtiga hadda la joogo **ultrasoundka** ayaa ah habka loo isticmaalo baaritaanka kilyaha,qalabka lagu arko habdhiska kaadi mareenka(Intravenous urography) waa midka ugu badan ee loo isticmaalo baaritaanka shaqada kilyaha. Kilyuhu waxay ku yaalaan qaybta dambe ee darbiga uur ku jirta,cabirkooduna wuxuu gaaraa dheer ahaan 10-12cm,ballacooduna waa 5-6cm,qotodooduna waa3cm,baaritaanka ultrasoundka ee kilyaha waxaa lagu sameeyaa gudbiyaha tiradiisu taahy 3.5MHZ.kelida midig iyo kalida bidix waxaa si fiican looga arki karaa dhinacyada,**ultrasoundka** caadigaa ee habdhiska kelyaha waxa lagu qimeyaa qaybta sare ee kilyaha.sida caadiga ah qaybta sare waa cadan.




Fig. 1. Normal aspect of the kidney

Cabirka kilyaha waxaa si fiican loogu isticmaalaa qaar ka mid ah cudurada kilyaha,cabirka kaliyuhu waxay la yaraadaan da,da (renal senescence) ama cudurada waqtiga dheer hayey kilyaha,kilyuhu waxay waynadaan markii cudur cusub ku dhaco sida son korowga(diabetes mellitus).

2. Kidney malformations(kalida oo si qaldan u samysantay).

a) Congenital single kidney(hal killi oo lagu dhasho)

cudurkani waa dhif dhif,Baaritaanka ultrasoundku wuxuu na tusiyaa hal kili,inta badan halka kali waa mid wayn,cabirkeeduna waa 12cm,Qalabka lagu arko hab dhiska kaadi mareenka (ntravenous urography),ayaa lagu xaqiijiyaa inay maqan taahy hal keli.

b) Unilateral small kidney(Hal keli oo yar)

waxaa laga yaabaa inay tahay xanuun lagu dhasho,**ultrasoundka** ayaa lagu xaqiijiyaa dhex roorka kelida inuu ka wayn yahay 2cm,yaraanshaha kelida waxaa laga yaabaa inay keentay caabuq waqti dheer kelida hayey.

3. Renal cysts(kelida oo biyo kusan kun jiraan).

a) Simple renal cysts(kuus biyoodka fudud ee keliyaha)

si guud waxa sababa lama yaqaan,laakiin waxaa laga yaabaa in ay la xariiraan da,ada waxayna ka yimaadaan qaybta sare ee kelida,biyaha kuusan ee kalida ku jira waxay noqon karaan hal(single) ama wax kabadan(multiple) markay hal yihiin cabirkoodu waa 1cm,makay badan yihiin cabirkoodu waa 10cm,xaladani madarna umana baahna daawayn ama qaliin,keliyaha waxaa loo baahan yahay in si joogta ah loo saaro **ultrasoundka**, lamana socdo dhabar xanuun,waxa ugu badan ee sababa waa(rheumatic).



Fig. 7. Parapyelic renal cyst



Fig. 8. Cortical renal cyst

b) Polycystic kidney(kuus biyoodka Badan ee keliyaha)

cudurkaani wuxuu ku yimaadaa dhaxal,waxaana lagu yaqaan 2da keliyood oo kuus biyoodyo badan ay galaan taasoo keenta in keliyuhu weynaadan kuus biyoodyada badan mar kasta waxay saameeyaan 2da keliyood, rejeda xanuunkaan ku dhacay 2da keliyood hadii ay noqoto in keliyuhu shaqadooda gabaan Bukaanku wuxuu u baahan yahay In laga miiro dhiiga kunjira kaliyaha(hemodialysis),hadii qofka lagu sameeyo baaritaan lagana helo xanuunka keliyaha carurtiisa waa in loo sameeyaa baaritaan **ultrasound**, muuqaalka **ultrasoundka** waxaa lagu ogaadaa Kuusbiyood yada badan ee

keliyaha,sido kale ultrasoundka waxa lagu arkaa muu qaal u eg sida miraha canabka(grape clusters)Kuus biyoodyada badan ee keliyaha waxaa laga yaaba inu keeno dhagax kalida ku jira.

c) Medullar cystic kidney disease(cudurka kuus biyoodka qaybta hoose ee Kelida)




Fig. 11, Fig. 12. Polycystic kidney

wuxuu caan ku yahay kuus biyoodyo badan oo lagu arko keliyaha iyo Tubooyinka soo aruursha kaadida oo balaarta, waxa keena cudurkaan lama yaqaan,wuxuuna ku dhacaa 2da keliyood ee dadka waa weyn,shaqada keliyuhuna waa caadi, Muuqaalka **ultrasoundka** waxaa lagu arkaa meelo badan oo mad madow.

4. Renal lithiasis (kidney stones)(Dhagaxa kalida)

Definition/Qeexitan: waa in wax adag ku samaysmaan tubooyinka keliyaha iyo kaadi mareenka,**Dhagaxa** kelida wuxuu kasamaysan yahay wax yaabaha soo socda: **calcium oxalate, calcium phosphate, ammoniummagnesium phosphate, uric acid or cysteine.** Samaysanka dhagaxa kelida waxaa saamayn ku leh Qoyska,cusbo inay ka buuxsanto kaadi mareenka(urinary salt concentration),isbadal ku yimaada aashitada kaadimareenka(change of urinary pH),caabuuq ku dhaca kaadi mareenka(urinary infections). Calaamadaha lagu yaqaan dhagaxa kelida kujira waxaa ka mid ah xanuun daran oo bukaanka ka qabta dhabarka kadibna ku faafa miskaha, bukaanka oo maalintii in badan kaadiya,kaadida oo gubta,dhiig soo raaca kaadida(hematuria) iyo caabuuq kusoo laa laabta habdhiska kaadi mareenka. Kiisaska qaarkood oo qaba dhaxa kalida wax calaamad ahn malaha(asymptomatic) laakiin baaritaan **Ultrasoundka** ayaa si

kadisa loogu ogaadaa dhagaxa kelida. Kiisas dhif dhif ah waxaa lagu arkaa inaysan kaadin(anuria). Muuqaalka **ultrasoundka** wuxuu sheegaa in dhagaxa kun jira kelida




Fig. 14, Fig. 15. Kidney stone: hyperechoic image with posterior shadowing

uu yahay cadaan(hyperechoic), dhagaxasi qaybta gadaale wuxuu ka bixiyaa hoos(posterior shadow),baaritaanka **ultrasoundka** waxaa lagu qiimeeyaa cabirka dhagaxa kelida ku jira, hadii dhagaxu ka yaryahay 5-7mm waxaa lagu saaraa biyo badan oo lacabo,haduu dhagaxu weyn yahay waxaa lagu daaweeyaa Qalabka lagu bur buriyo dhagaxa kelida oo loo yaqaan(lithotripsy).



Fig. 24. Hypoechoic renal tumor



Fig. 25. Isoechoic renal tumor

5. Hydronephrosis(kaadida oo ku laabatay kelida)



Fig. 18. Mild hydronephrosis



Fig. 19. Moderate hydronephrosis



Fig. 20. Severe hydronephrosis with dilated ureter

Definition/Qeexitan: waa tubooyinka kaadi mareenka oo balaartay(Godadka yaryar ee kaadidu marto((calyx), Tubooyinka sare oo weynaaday(renal pelvis) iyo inay xirantay qeyb kamida kelida(pyelo-ureteral junction). Waxa ugu weyn ee sababa inay kaadidu ku laabato kalida waa, Dhagax kalida gala(renal lithiasis), Burada kelida(renal tumors),Burada borostaatda(prostate adenoma),Dhiiga oo xinjirooba(blood clot),Kalida oo ay xiraan kuusn biyoodyo(obstructive renal cyst). Inay xirmaan tubooyinka kelidu waxaa ugu wacan cadaadis xoog leh oo saaran tubooyin.muuqaalka **ultrasoundka** waxaa lagu arkaa midab madow,kaadida oo ku laabata kelida waxaa loo qaybiyaa 3. **A.** kaadida ku laabatay kalida oo yar (mild), **B.** kaadida ku laabatay kelida oo dhex dhexaad ah(moderate), **C.**kaadida ku laabatay kelida oo badan(severe).

6. Renal tumors(Burooyinka keliyaha).

a) Malignant tumors(Kansarka kalida)

Kansarka keliyahu wuxu ka yimaadaa unugyada tubooyinka keliyaha. Wuxuuna 3% ka yahay kanasarka ku dhaca xubnaha gudaha, markii uu ku dhaco 3 nin waxa laga hela 1 dumar ah. Wuxuna ku badan yahay dadka da dodu u dhaxayso 50-70 sano. Calamadaha lagu yaqan kansarka keliyaha waxaa kamid ah. Kadida oo dhiig soo raaco(hematuria), dhabar xanuun, iyo buro kuusan oo lataban karo(palpation of a tumor mass). Buradu waxay gashaa xididada kadibna waxay samaysaa xin jirow.markaasna waxay ku fafata sanbabaha,lafaha,iyo berka. Muqalka **ultrasoundka** ee burada kelida wa madow(hypoechoic),ultrasoundka waxaa lagu ogada cabirka buradan wana (10 cm).baritanka **ultrasoundka** ee buradan waxa lagu qimeyaa in buradu gashay xididadakaliyaha & wadnaha.

b) Benign renal tumors(burada aan faafin ee kelida).

Buradaan aan faafin ee ku dhacada kelida waxay ka koobantahay Nude jilicsan,Muruq xargeed siman iyo xididada dhiiga,muuqaalka **ultrasoundka** waxaa lagu ogaadaa midab cadaan ah iyo kuus cabirkiisu yahay 3cm.

6. Renal hematoma(Dhiig ku jira Keliyaha)

